KUMAA TAHAY?

Isbaro Aad Guuleysatide

maxamuud xuseen
maxamuud

Somali Library
t.me/somalilibrary

KUMAA TAHAY?

Isbaro Aad Guuleysatidee

Author: **Mahamoud Hussein Mahamoud**

b

Tusmada Buuga

Mahadnaq……..4

Hibayn……..5

Hordhaca qoraaga……6

Maxaa qabsatay oo guulo ah…….7

Waa maxay guul…….7

Tusaalo yar oo dhiiro gelin ah……8

Maxaa naga hortaagan inaan guuleysano……..11

Kumaa tahay adiga……..13

Sidee loo samaystaa hadaf/qorsho…….15

Waa maxay mission iyo vision…….17

Maxay dadka ugu fashilmaan gaarista yoolalkooda.....18

Ka guuleyso caqabadaha……19

Sidee u heli kartaa wax walba oo aad u baahan tahay……20

MAHADNAQ

Waxaa mahad dhamaanteed iska leh eebbe ee anay jirin cid la la bardhigo ama lamida cilmigiisa, awoodiisa, naxariistiisa iyo raxmadiisa.

Adoomadiisa ku arsaaqay nimcooyin badan oo aan la soo koobi Karin, ee ii suurto galiyey inaan qoro oo aan isku dayo diyaarinta buugaan.

Waxaan marka labaad u mahadcelinayaa cid kasta oo ka qayb qaadatay, ilana hawlgashay ee igu dhiirigalisay inaan soo saaro si ay akhristayaashu ugu faa'iidaystaan iyo cid kasta oo xiisaynaysa akhriska buugaan.

HIBAYN

Waxaan u hibeeyey waalidkaygii I koriye, kuna hawlanaa kobcinta garaadkayga, jidhkayga, iyo aqoontaydaba, gaar ahaan hooyadayda **khadiijo abdi abukar** iyo aabahay **Hussein mahamoud jim'ale.** Sidoo kale waxaan u hibeeyey qofkasta oo doonaysa aqriska buugaan (**kumaa tahay)….**

HORDHACA QORAAGA

Ku soo dhawaaw walaalkayga/walaashayda akhristaha ahow, kuna soo dhawaaw buugaan magaciisu yahay kumaa tahay isbaro aad guuleysatidee oo aan filayo inaad ka helidoontid.

Buugaan sida ka muuqata ciwaankiisa waxaan diirada ku saarayaa shaqsiyada qofka, noocyada dadka, sidoo kale buugaan wuxuu ka hadlayaa sidii aad isku baran lahayd oo aad u noqon lahayd qof isyaqaana nafsadiisa ogna awoodihiisa.

Buugaan wuxuu kaaga jawaabi doonaa su'aalahaan

Kumaa tahay?

Waa maxay guul?

Maxaa iga hortaagan guusha?

Sidee ku heli karaa wax kasta oo aan rabo?

Bani’adamku illahay wuu karaameeyey, waana wax qasab noogu ah inan kaga mahadcelino rabigeena

Oo aan u soo koobi Karin nimcooyinka uu nagu manaystay, lakin dadku badanaa ma’oga oo waa ay

Ka qadsanyihiin nimcooyinka uu alle siiyey.

Hadaba su’asha waxay tahay

- **Maxaa Qabsatay Oo Guulo ah?**

Dadku badanaa waxay dhahaan guul inaad gaarto waxay ku xerantahay nasiibkaada ama in aad ka dhalato qoys qani/taajir ah hadaba adigu isweydii

- **Waa Maxay Guul?**

Jawaabta waad helaysaa hadii aad tahay qof guul doon ah. Sidoo kale guushu waa wax u baahan in la raadiyo wayo majirto guul iska imaada guul kasta waxay ku imaadaa hadafyo laqorto islamarkaana lagu dhaqaaqo fulintooda.

Hadafyadaadu waa in ay ku leeyihiin hadafyo u baahan in lagu xaqiijiyo waqtiyo yar iyo hadafyo u baahan in lagu xaqiijiyo waqti dheer.

Aragtida layaabka leh ee dhalin badan aaminsanyihiin ayaa ah “anigu ma noqon karo taajir ama magaari karo guulo sababtoo ah kama dhalan qoys qani ah”, waana aragti dhalin badan ku kaliftay inay isdhiibaan oo quus ka muujiyaan nolol hadaba bilaw u tahay.

- **Waxaan rabaa akhristoo inaan ku sheego oraah dhiiro gelin ah oo aan naftayda ku dhiiro geliyo marka ay u weecato dhankaas----**

Qofka guul doonka ah marnaba dooq uma ahan isdhiibitaan, dadaal yari iyo aragti la’aan.

Wuuna umarayaa dadaal kasta oo uu ku xaqeejin karo yoolalkiisa.

Hadaba aan ku sheego oraahda tusaaleed oo aan naftayda ku dhiiro geliyo..

Tusaalaha aan naftayda u soo qaato inay isdhiibin ayaa ah Kasoo qaad waxaad rabtaa inaad fuusho dabaq 40 biyaano ah waxaadna rabtaa biyaanada afartanaad. Waxaad ku tagi kartaa labo qaab oo kala ah wiishka inaad korto ama inaad jaran jarada ku tagto adiga oo lugaynaya, waa ay kala duwanyihiin labadaas qaab oo aad u kori lahayd biyaanada afartanaad. Hadii aan ka fiirino **xaga watiga** iyo xaga **waxyeelada caafimaad**.

Xaga waqtiga hadii aan ka fiirino wiishka wuxuu kugu gaynayaa waqti yar, halka jaranjarada aad ku tagi kartid waqti dheer.

Xaga waxyeelada caafimaad ee sidoo kale ku kala duwanyihiin wiishka wuu ka saameyn yaryahay jaran jarada, halka jaran jarada waxyeeladayda caafimaad kamid yihiin daal murqaha ah, garaaca wadnaha oo saa’id noqda, tabardari i.w.m.

Dadku waa labadaas midkood.

Qofka ka dhasha qoyska qaniga ah waxaan ku tusaalaynaynaa qofka dabaqa ka koraya wiishka.

Halka qofka ka dhasha qoys sabool ah aan ku tusaalaynaynaa qofka dabaqa ka koraya jaran jarada.

Hadii aad dabaqa ka kortid wiishka ama jaran jarada waad tagaysaa biyaanada aad rabtid.

Tusaalahaan wuxuu sheegayaa in aysan guushaadu kaliya ku xerneen inaad ka dhalato qoys qani ah balse dhankasta guul ka gaari karto ama ka dhalo qoys sabool ah ama qoys qani ah.

Rabitaankada oo noqda mid xoogan, dadaalkada oo noqdo dadaal dheeri ah, qaladadka oo aad ka barataa cashiro, waxay kuu horsaydayaan guulo la taaban karo.

- **Maxaa Naga Hortaagan In Aan Guulaysano?**

Dadka badanaa su'aashaan way ka ganbadaan in ay ka jawabaan, laakin waa su'aal muhiim ah in aad isweydiiso hadii aadan hore isku weydiin.

Su'aashaan malahan jawaab qofkasta ku wada qancaayo waayo qofkasta anaga naga mid ah waxbaa ka hortaagan guushiisa uu qofka kale kaga duwanyahay, tusaale qofbaa laga yaabaa inuu guushiisa ka hortaganyahay asxaabta uu la socda, ama inuu leeyahay balwada xun – xun sida qaadka, tubaakada, sigaarka, xashiishka, i.w.m

Qofkasta waa inuu waqti laqataa naftiisa uu isweydiiyaa waxyabaha ka hortaagan inuu guulaysto.

Kadib aqristoo waad helaysaa jawaabta.

Waa in aad qortaa dhamaan waxyaabaha ka hortaagan guusha oo aad qortaa ayagoo taxan, kadib waa inaad ku dadaashaa sida aad ku xalin lahayd caqabadahaas.

Tusaale hadii aan ka soo qaato caqabada ka hortaagan guusha waa adigoo saaxiib la'ah asxaab aan fiicnayn, balwada, iyo adiga oo aan u baraarugsanayn inaad guul gaarto.

Markaas kadib waa inaad xalisaa dhamaan caqabadahaas, hadii aad asxaab la'ahayd asxaab xun – xun waa inaad ku badalataa asxaab fiican, hadii aad tahay qof daris la'ah maandooriyayaasha noocyadiisa kala duwan sida (sigaarka, qaadka, taabuuga, shiishada, i.w.m) waa inaad joojisaa isticmaalkooda, sidoo kale hadii aadan u diyaarsanayn inaad guul gaadho waa inaad u diyaar garowdaa maskax ahaan iyo jir ahaan ba.

- **Kumaa Tahay Adigu?**

Khoraagii weynaa ee Ibrahim al faqi wuxuu u qeybiyey dadku inay 6 nuuc yihiin, hadaba aqristoo adiga lexdaas keebaa tahay.

1. Qof aan lahayn qorsho ama hadaf inta uu noolyahay, maalmuhu ee ku dhaafaan asiga oo aan wax qabsanin, hadii aad la sheekeysato dadkaas oo aad weydiiso waa maxay hadafkaaga, kugu jawaabayo mar hadii aan noolahay igu filan.
2. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, balse aan aqoon wadadii uu u mari lahaa gaarida guushiisa.
3. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, balse aan ku kalsoonayn naftiisa.

4. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, balse isqaad qaada ama naftiisa buun buuniya.

5. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, sidoo kale aan isqaad qaadin, balse qaata go'aamo fashaliya guulihiisa.

6. Qof leh hadaf yaqaana waxa uu rabo inuu ka guul gaadho, sidoo kale yaqaana wadadii uu mari lahaa gaaridooda, naftiisana ku kalsoon, sidoo kale aan isqaad qaadin, qaata go'aamo waxtar leh, hadii uu guulo gaadho aan joojin tartarka sidoo kale guulo kale inuu xaqiijiyo u qalab qaata.

Hadaba akhristoo waad ogaatay 6 qaab ee dadku yihiin, waadna ogaatay lixdaas qaab ee dadka loo qeybiyo qofka aa ka tahay.

- **Su'aasha isweydiinta leh ayaa ah adigu ma leedahay hadaf ama qorsho?**

Hadaba hadii ay jawaabtaadu maya tahay, qaad akhristoo talaabooyinkaan oona ku dhaqan.

- **Fikir**: haa tani waa talaabtaada kobaad, fakir oo waqti la qaado naftaada adiga oo kala sheekeysanayo waxa ay u baahantahay ama ay rabto inay hesho.
- **Go'aan**: kadib markii aad ogaatay waxa aad u baahantahay inaad ka miro dhaliso, qaado go'aan adag oo ah inaad rabto inaad ka guul gaadho hadafyadaada.
- **Qor**: u qor hadafyadaada sida ay u kala muhiimsanyihiin.

- **Sheegid**: u sheeg hadafyadaada dadka positive ka ah, dadka kugu dheero gelinaya ka miro dhalinta hadafkaga.
- **Qorsheyn**: qorsheey talaabada aad u qaadaysid ka miro dhalinta hadafyadaada.
- **Dhiirogeli naftaada**: ugu sheekeey nafttaada waxyaabaha kuu qabsoomay, waayo tani waxay sababaysaa in ay xamaasadaadu marna hoos u dhicin oo aadan niyad jabin.
- **U dabaal dag**: u dabaal dag guul kastaa oo aad ka miro dhalisay, hana hilmaamin markasta in aad allah ugu mahadceliso waxkasta oo aad la kulanto guul/guuldaro.

Akhristoo talaabooyinkaan waa talaabooyinka aad u qaadi lahayd sida aad ku daji sanlahayd hadafyo ama qorshooyin cad.

Hadaba si aad u sameysato qorshe nololeed waxaad u baahantahay in ay kuu cadyihiin labadaan mission iyo vision.

- **Vision**: oo ah aragtidaada ama riyadaada.
- **Mission**: oo ah habkii aad u hawl galaysid sidii aad ugu dhabayn lahayd aragtidaadii ama riyadaadii.

Tusaale: hadii aad rabto inaad noqoto macalin.

Inaad noqoto macalin waa aragtidada amma vision kaga, lakin inaad u hawlgasho ka miro dhalinta aragtidaada ayaa ah mission kagii.

Hadii aadan lahay vision iyo mission waxaad la mid tahay qof doon ka xeenaya lakin aan aqoonin wadada saxda ah uu ka mari lahaa badda.

Inaad ka xayso doonta waa ay fududahay lakin inaad garan weydo wadada saxda ah ee aad marin lahayd doontii ayaa ah dhibaato weyn.

Hadaba akhristoo sameyso qorsho hadii aadan lahayn qorshayaal oo ka dhig maalamahaaga maalmo qurux badan……..

- **Maxay Dadku Ugu Fashilmaan Gaarista Yoolalkooda?**

- **Yoolalka oo ah kuwa lasaadaalin Karin**: yoolalka waa in ay noqdaan kuwo macquul ah, kuwo hagaagsan, la qiyaasi karo oo la gaari karo. Haddii kale looma tarjumi karo qorshayaal waxqabad leh.
- **Qorshaha oo aan horay loo sii samayn**: qorshahaaga waa inaad qortaa adigoo kala siinaya qorshayaasha koobaad iyo qorshayaasha labaad, micnaheedu waa in uu marnaba dooq kuu noqon isdhiibid,

hadii qorshaha koobaad ku fashilantid ka shaqaysii qorshaha labaad.

- **Aamin la'aan**: sidoo kale waxyabaha dadka badanaa ugu fashilmaan gaarista yoolalkooda waa iyaga oo aan aminsanayn inay ka miro dhalin karaan yoolalkooda.
    - **Ka Guulayso Caqabadaha…..**

nolosha ma ahaan karto bilaa caqabad, qofkasta waxa uu la kulmayaa caqabad

laakiin qofkasta isku si uma arkaan caqabada.

Ka waran hadii nolosha ahaan lahayd bilaa caqabad oo aad waxkasta oo aad rabto aad heli lahayd adiga oo aan u dhibtoon u rafaadin?

Dadku badanaa waxay u arkayaan inay tahay wax fiican inaad hesho waxkasta oo aad rabto adiga oo aan u dhibtoon, laakiin xaqiiqda

dhabta ah sidaas ma'ahan waxaad noqon lahayd qof daciif ah, qof aan sheegan Karin guulihiisa, qof aan wax ka fahansanayn nolosha.

Caqabadaha iyo dhibaatooyinku waa qaybo muhiin u ah nolosha oo ku siinaya khibrado.

Dhibaatada ugu weyn ee dadka haysata

Suurtagal ma'ahan inaad noqoto qof qabiir ah, qof garaad leh, hadii aadan la kulmin caqabado.

- **Sidee U Heli Kartaa Wax Walb Oo Aad U Baahantahay?**

Wey fudutahay in aad ogaato waxa aad u baahantahay,laakin waa arin adag marka ay timaado sidii lagu heli lahaa, in aad hesho wixii aad rabtay wey ka adagtahay ama ka fudutahay sida aad u maleyneysay,

qeybta hoose waxaa aan kaga doodi doona habab kuu sahli kara in aad hesho wixii aad rabtay.

Mid ka mid dadka wax ku qora website-ka “Quora” ayaa la weydiiyey “sidee ku heli karaa wax walbo oo aan rabo? , waxa uu ku jawaabay ” dabcan qaabka ugu fudud ee looga jawaabi kara su’aashaasi waxa ay tahay in aan dib u qorno su’aasha oo aan ka dhigno “sidee baan ugu qalmi karaa in aan helo wax walbo aan rabo?.

Dhab ahaantii waa shaqo adag, hase yeeshee in aad hesho wax walbo oo aad u baahantahy kaliya lacag kama hadleyno,waxa aan ka hadleynaa dhinacyada kala duwan ee nolasha sida farxad, xiriir wanaagsan, guur fiican, shaqo fiican, waad heli kartaa xitaa lacagta, kaliya waa in aad xasuusnaataa hal arin oo ah “waxa aad aaminsantahay”..

Hoos waxaa ku qoran qodobo kugu gacan siin kara safarkaada dheer ee aad ku raadineyso waxa niyadaada ku jira, waliba waxa aan kuu sameynayaa damanaad qaad , waxa aad adiga hadda raadineyso qof kale ayaa horay ugu guuleystay, iska hubi in aad fulisay dhamaan qodobada sida ay u dhan yihiin.

1#. Hadii aad aaminsantahy waad gaari kartaa

Midabka maqaarka jirkaaga muhiim ah, muhiim ma ahan goobta aad ku dhalatay , muhiimna ma ahan qaraabadaada iyo qoyska aad ka dhalatay, arinta kaliya ee muhiimka ah waa “Adiga iyo waxa aad aaminsantahay”.

Iska hubi aaminaataada in ay tahay “Wax walbo waa dhici karaan” waa kan xadiithkii rasuulka SCW ee macnihiisu ahaa

“Ilaah waxa uu qofka siiyaa waxa uu aaminsanyahay”.

- Xadiith Qudsi

Henry Ford waxa uu ahaa ninkii ugu horeeyey ee Ameerikaan ah oo sameeya warshad baabuurta sameysa, eradayada lagu xasuusta waxa ka mid aha murtidiisa caanka noqotay ee aheyd

“hadii aad aaminsantahay in aad sameyn karto ama aad aaminsantahay in aad sameyn karin labaduba waad saxantahay”.

Henry waxa uu aaminsanaa in muhimaadda qofka iyo helitaanka wixii uu rabay ay ku xiran tahay oo kaliya “Waxa uu aaminsanyahay”.

Sidee buu u guuleysanayaa qof aaminsan waxyaabo uu isaga iska dhaadhiciyey sida “fursad ma haaayo”, “meel xun ayaan ku

noolahay”,”Lacag aan isku furdaamiyo ma haayo”, ogow waxyaabahan aad isku sheegtay waxa ay noqon doonaan “run” maxaa yeelay waad aaminsantahay,

Dadka aaminsan in ay sameyn karaan “Wax waliba” waxa ay u bareeraan qataraha, waxa ayna sameeyaan Isku Day, xitaa hadii aay waayaan hadafkoodii weynaa, horay ayey u socdaan, waxa ayna ka soo tagaan EBER waxa ayna gaaraan Heer, waxa ay ka soo tagaan rajo xumo, waxa ayna hiigsadaan Guulo.

2#Ficil Sameey

Aaminaada oo kaliya naguma filna, si aan u helno wax walbo oo aan u baahanahay waa in dhaqaaq sameynaa, markase aan ka hadleyno Ficilka waxaa jira quraafaad da’ah oo dadka intooda badan ay aaminsanyihiin taasi ah ah

“Waxaan sugayaa intii waxa iskukey toosaan”

Jooji , waxaan ku xaqiijinayaa in aysan jirin maalin ay wax walbo iskukaa toosi doonaan, mar walbo arin unbaa khaldan, sidaa darteed markii ugu fiicneyd ee aheyd in aad howsha bilwoda waa sanadkii hore, hadii taasi aysan dhicin waqtiga kale waa hadda, hadda bilow, waxaa jirta maahmaah shiineys ah oo dhaheysa

“Waqtiga ugu haboon ee geed in la beero ay aheyd waa 20 sano ka hor, waqtiga labaad ee ugu fiican ee la beeri karo waa hadda, hadda beer”

3# Isku Dayga Ha Joojinin

Muhiim ma ahan qaabka ay ku socoto nolashaada qaab xun mise qaab wanaagsan, waxaa laga yaabaa in aad raadineyo cudurdaar si aad howsha u joojiso, ogow waxaa fiican in fikirkaasi aad ku badalato mid kale oo ka soo horjeeda kaasi oo ah "raadi cudurdaar si aad howsha u sii wadi karto".

Dadka waxa ay ku sheegi doonaan kun sababood oo ay habboontahay in aad joojiso waxa aad ku fikireyo, diyaar ma u tahay in codadkaasi aad maqasho.

Dooqa adiga ayaa iska leh Waxaa dhici kartaa in guushaada ay ka dhawdahay sida aad fileyso, howsha wad, hana niyad jabin.

waa kan Albert Hubbard oo ah feylasoof Mareykanka waxa uu na leeyahay

“Ma jirto guuldarro aan ka aheyn in aad joojisay Isku Dayka”

Waxa aan ku dhaxnoolnahay bulsho dag dag ka sameysan, markii wixii aan rabnay aan ku heli weyno si dhakhso ah cabasho ayaan bilownaa, laakiin runtu waxa ay tahay wax wanaagsan waxaa hela dadka wax sugta waa halka ay soomaalida tiraahdo “Ma Sugto mahar ma leh” sidoo kale soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa.

“Ninkii Sabra ayaa Sad Hela”.

DHAMAAD